Dacwadda-isku keenista qooyska ee dadka heysta oggolaasho magangelyo

Waxa aad heysataa oggolaasho magangelyo waxa aadna rabtaa in aad isku keenista qooyska codsato
Waxaa lagu siiyay oggolaasho magangelyo oo wakhti xaddadan. Marka hadda waxa aad rabtaa xubnaha qooyskaada oo dibadda ku sugan in ay Nederland yimadaan. Adiga waxa aad tahay dalbadaha. Taasi waxaa lagu jeedaa in magaca qooyskaada aad codsi ku soo gudbisay. Ujeedka codsiga waa in la bixiyo oggolaasho magangelyo oo Holandees ah. Codsigaasi waa lacag la'aan.

Dacwadda isku keenista qooyska waxa ay ka kooban tahay laba qeybood:
- Qeybta 1aad waxa ay quseysaa codsiga ' awood siin joogitaan ku meel gaar ah (mvv) – ka soo daba safrayaal magangelyo'. Mvv-da waa fiiso joogitaan muddo dheer. Taasi ayaana qooyskaada u saamaxayso in ay Nederland u soo safraan.
- Qeybta 2aad waxa ay quseysaa bixinta oggolaasho magangelyo marka uu qooyskaada Nederland yimaado keddib. Xubnaha qooyskaada waxaa la siinaayaa oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyayeen : joogitaankooda waxa uu ku xiran yahay oggolaashadaada magangelyo.

Buuggan warbixineed waxa aad tallabo tallabo uga akhrisan kartaa sida xubinta qooyskaada ay ku heli karto oggolasho magangelyo oo la soo minguuriyay.

Oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay: xubnaha qooyska iyo xujjooyinka

Oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay waa oggolaasho oo loogu tala galay in adiga lagugula noolaan karo Nederland. Xubnaha qooyskaada iyo adiga waa in aad soo buuxisaan xujjooyinka Sharciga Ajaanibta.

Xubnaha qooyska oo oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay heli karo

1. lammaanahaada oo guur sharciyeysan isku qabtaan ama xiriir kaasi la mid ah;
2. ilmahaada oo aan qaangaarin ama kuwa lammaanahaada haddii uu ka mid yahay qooyskaada. Taasi waxa ay quseysaa ilmaha aad dhashay ama sidig – ama korsi ah;
3. ilmahaada oo qaan gaaray kase tirsan dhab ahaan qooyskaada. Xiriirka qooys ee ilmahaada ma aha mid go'ay. Taasi waxa ay quseysaa ilmaha aad dhashay ama sidig – ama korsi ah. Ilmahaada da'dooda ka weyn tahay 25 sano waa in ay jirtaa isku xirnaasho oo midda caadiga ah ka baxsan;
4. aabahaa iyo hooyada ku dhalay haddii aad keli tahay, oo aan qaangaarin welina guursan.

Xujjooyinka oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay

- Xubnaha qooyskaada waa in wakhtiga gudihiis ku soo galaan Nederland. Wakhtiga waxaa lagu jeedaa muddo 3 bilood gudahood. Kaasi waa muddada ka soo dabasafarka. Muddada ka soo dabasafarka waxa ay billaabaneysaa maalinta lagu siiyay oggolaasho magangelyo. Xubnaha qooyskaada laba hab ayeey wakhtiga gudihiis ku soo geli karaan:
  1. Xubnaha qooyskaada waxa ay si dhab ah u soo geleyaan Nederland muddada ka soo dabasafarka gudaheed ama ka hor.
  2. Xubnaha qooyskaada waxa (aad adiga) u codsaneysaa gudaha muddada ka soo dabasafarka mvv ka soo dabasafris ee magangelyo.
- Xubnaha qooyskaada inta aad dibadda joogteen ayeey ka mid ahaayeen qooyskaada. Taasi waxaa loo yaqaan xiriirka qooyska. Xiriiirka qooyska waa in uu weli jiraa marka ay qooyskaada Nederland soo galaayaan.
- Xubnaha qooyskaada waa in ay aqoosigooda iyo xiriirka qooyska ay kula leeyihiin ku soo caddeyaan dokumenti. Xagga hoose ka akhriso dheeraad ku saabsan dokumentiga.
- Xubnaha qooyskaada inta ka da' weyn 12 sano jir marka ay codsiga sameynayaan waa in ay saxiixaan caddeyn in aysan hore dembiyo u gelin. Taasi waxaa loo yaqaan caddeynta dhacdooyinkii hore.
- Xubnaha qooyskaada oo 15 san jir ama ka da' weyn waa in ay caddeyn xaalka guur ay saxiixaan inta codsiga socdo.
- Waxa aad adiga leedahay oggolaasho joogitaan magangelyo oo shaqsi ah.
- Waa in aad caddeyn saxiixdaa in aad dalbadaha xubnaha qooyskaada tahay.
- Hore ayaad dacwaddaada magangelyo ugu magacaawday xubnaha qooyskaada.
- Adiga iyo lammaanahaada da'diina waa ay ka weyn tahay 18 jir.
- Ma codsatay (adiga) keenista ilmahaada da' yar iyada oo uu ku haray waalidka kale oo ilamaha dhalay waddan dibadda ah? Markaasi waa in uu waalidka ka soo haray uu ilmahaada siiyaa oggolaasho in uu u safri karo Nederland.

Ma leedahay (ma qabtaa) hal xaas ka badan.? Markaa hal lammaane oo keli ah ayaad keeni kartaa iyo ilmaha aad lammaanahaas wada dhasheen. Sharciga Nederland waxaa ku taal in muwaadinka uu yeelan karo hal qof oo keli ah oo ay is qabaan (lammaane yihiin).

Ka soo bixid la'aan xujjooyinka oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay

Xaaladaha soo socda adiga iyo xubnaha qooyskaada waxa aad ka soo bixi weyseen xujjooyinka:

- Wakhtiga ka soo dabasafrista ayaa dhacay. IND ayaa qiimeyneysa markaa in keenista codsi lala soo daahay la cafin karo;
- Waxa aad rabtaa in aad keensato xubno qoyskaada oo ka baxsan kuwa halkaan lagu magacaabay;
- Waxa aad adiga leedahay oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay.

Ma rabtaa iyada oo ay xaaladda sidaa tahay in aad codsato isku keenista qooys? Markaasi waa in aad raacdaa dacwadda caadiga ah oo la joogitaanka reerka- ama qooyska. Cadsigaasi waa mid lacag joogo waana mid nidaamkiisu adag yahay. U adeegso kaasi foomka codsiga ee "Codsi la joogitaan reerka ama qooyska (codsade)". Waxa aad foomkaas ka heleysaa www.ind.nl/familie.

Waxa aad tahay codsade keligiis ah, oo aan qaangaarin

Markaa waxaa aad codsi isku keenista qooyska ku dalban kartaa waalidka ku dhalay oo keli ah. Keenista wiilasha iyo gabdhaha aan qaangaarin iyo kuwa qaangaaray oo kula dhashay waxa aad raaceysaa dacwadda caadiga ah ee la joogista reerka- ama xubnaha qooyska. Codsigaasi waa mid lacag joogo.

Hey'adaha oo adiga iyo xubnaha qooyskaada aad la kulmi kartaan

Ministerie van Buitenlandse Zaken

Wasaaradda Arrimaha dibadda (**BZ**) waxa ay dowladda Nederland ku mesashaa dibadda. BZ waxa ay safaarado ku leedahay waddamo kala duwan oo dunida. Safaaradaha Nederland waxa ay xubnaha qooyskaada ku caawini karaan codsigooda isku keenista qooyska. Safaaradaha iyadoo lala ballamaayo waxa ay ka qaadi karaan xubnaha qooyskaada wareeysiyada iyo agabka-DNA. Taasi waxa ay ku dhacda mar kasta codsiga IND. Ma oggolaatay IND in xubnaha qooyskaada la siiyo mvv? Markaasi xubnaha qooyskaada waxa ay ballan keddib tegi karaan safaaradda si ay u hirgeliyaan bixinta mvv. (www.rijksoverheid.nl)

Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Justitie en Veiligheid

Adeegga Migreshanka iyo Jinsiyadda (**IND**) waa waax ka mid ah Wasaaradda Cadaaladda iyo Nabadgelyada Nederland. Shaqaalaha IND waxa ay baarayaan in xubnaha qooyskaada ay soo dhammeys tireen xujjooyinka isku keenista qooyska. Iyaga waxa ay baarayaan in dokumentiga mid rasmi ah yahay. Waxa kaloo ay iyaga dibadda ka billaabi karaan baaritaan dheeraad ah. Kuwaasi waa baaritaanka DNA-ga iyo wareeysiga xubnaha qooyskaada. Shaqaalaha IND waxa ay xitaa adiga Nederland kugu weydiin karaan su'aalo. Markaa keddib waxa ay go'aan ka gaaraayaan in xubnaha qooyskaada ay Nederland u soo safri karaan. (www.ind.nl)

gza healthcare

Daryeelka Caafimaadka Magangelyo Doonka (**GZA**) waa hey'adda ay xubnaha qooyskaada marka ay xerada ku jiraan u tegi karaan haddii ay jirran yihiin ama su'aalo xagga caafimaadka qabaan. Rug kasta oo dejjinta ee COA ama agteeda waxaa ku yaal xaruun caafimaad ee GZA. GZA waxa ay u sameyneysaa ballamada xogheynta dhakhtarka, kalkaalisada, caawiyaha GGZ ama dhakhtarka qooyska. Su'aalaha caafimaad waxa ay habeen iyo maalin weydiin karaan iyaga oo wacaaya xaruunta xiriirka caafimaad ee "de Praktijklijn": 088 112 21 12. Isniinta ilaa iyo jimcaha waxa ay nambarkaas weydiin karaan xitaa su'aal aan caafimaad quseynin sida tusaale ahaan u gudbinta dhakhtar taqssus ah.

VluchtelingenWerk Nederland

Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland waa hey'ad xuquuqda bani'aadamka oo madax bannan oo difaacda danaha magangelyo doonka iyo qaxootiga. Shaqaalaha Hey'adda u Adeegta Qaxootiga waxa ay ku siinayaan warbixin ku saabsan dacwadda isku keenista qooyska. Waxa ay kugu caawini karaan buuxinta foomka codsiga isku keenista qooyska. Waana ay ku hagayaan adiga iyo xubnaha qooyskaada inta ay socoto dacwadda isku keenista qooyska. Xitaa dhibatooyinka hey'ada kale ayeey kaa caawinaayaan. Hey'adda u Adeegta Qaxootiga ma laha go'aan ka gaarista codsiga isku keenista qooyska. (www.vluchtelingenwerk.nl)

COA Centraal Orgaan opvang asielzoekers

Xubinta Dhexe ee Dejjinta Magangelyo Doonka (**COA**) waxa ay magangelyo doonka siisaa dejjin iyo hagis inta ay socoto dacwadda magangelyo. Taasi waxa quseeysaa xitaa ka soo dabasfrayaasha loo oggolaadan in ay Nederland u soo safraan. COA waxa ay siineysaa hooy, raashin iyo ceymis kharashka xanuunnada oo ku meel gaar ah haddii loo baahdo. COA waxa ay kugu caawineysaa dhakhtar haddii aad u baahato inta aad xerada ku jirto. COA waa hey'ad madax bannaan mana ka gaarto go'aan codsiyada isku keenista qooyska (www.coa.nl)

IOM·OIM INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION
THE UNITED NATIONS MIGRATION AGENCY

Hey'adda Caalamiga ee Migreshanka (**IOM**) 100 xafiis oo aduunyada ku kala baahsan ayeey ka garabgashaa dadka socdaala. Waxaana ka mid ah keenista xubnaha qooyska ee kuwa leh oggolaasho magangelyo. IOM waxay ku siin kartaa garabgal oo aad iibsaneyso oo adeeg talo bixin ah ama hagis dhammeystiran oo safarka. Labadaasiba waxaad ka codsan kartaa inta lagu iibinaayo website-ka. IOM kuma siin karto garabgal dhaqaale oo isku keenista qooyska. (www.iom-nederland.nl)

Dacwadda isku keenista qooyska ee dadka heysta oggolaasho magangelyo



Qeybta 1. 8da tallabo ee codsiga mvv ee ka dabasafrayaasha magangelyo

Talaabada 1: Keenista codsiga

Adigaa foomaka codsiga (dijitaal ah) buux buuxinaya. Fomkaas waxa aad ka heleysaa website-ka IND: www.ind.nl/asiel (dalbo: Familielid van vluchteling). Waa in aad xubin kasta oo qooyska u isticmaasha foom gooni ah. Website-ka IND waxa aad xitaa ka heleysaa foom afka ingriiska ah oo aad isticmaali karto. Shaqaalaha Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland waxa ay bixiyaan warbixin ku saabsan dacwadda isku keenista qooyska. Iyaga waa ay kuugu caawini karaan buux buuxinta foomka codsiga.Waana xitaa ku hagayaan inta dacwadda ka dabasafarka ay socoto. Ma tahay mid aan qaan gaarin? Mas'uulkaada NIDOS ayaa codsiga kugu caawini karo.

Akhri tilmaamaha foomka codsiga oo dhan raacna. Ku buuxi astaamaha shaqsiga ah ee xubnaha qooyskaada si waafaqsan dokumtiga rasmiga ah. Kuwaasi waa magaca, taariikhda iyo rugta dhalasho, qaraanimada iyo xaladda guur. Soo raaci xubin kasta oo qooyska sawir dhow oo wacan. Codsiga qoraalka ah waxa aad sawirka xubinta qoyskaada ku soo dhejineysaa warqad A4 ah oo cad. Sawirka agtiisa ku qor astaamaha shaqsiga.

IND waxa ay xubnaha qooyskaada ka sugayaan in aqoonsigooda iyo xiriirka qooys ay kula leeyihiin in ay caddeyn karaan dokumenti rasmi ah. Kuwaasi waa dokumenti rasmi ah oo ay soo saareen hey'adaha dowliga ee waddanka aad ka timid. Laakiin xitaa dokumenti garab gal ah oo aan rasmi ahayn. Taasi waxa ay keeneysaa in ay xubnaha qooyskaada dokumentiga rasmi ah ay adiga Nederland kugu soo diraan. IND ayaa sheegeysa dokumentiga rasmiga ah ee la rabo in la soo diro. IND waa ay tixgelineysaa dokumentiga aad adiga u baahan tahay. Dokumenti rasmi ah oo aqoonsi waa in laga helaa taariikhda iyo rugta dhalasho waana in sawir saaran yahay.

Dokumentiga la codsaday waa in ay ku tarjuman yihin afka nederlandka, ingriiska, fransiiska ama jarmalka. Tarjumaha waa in uu noqdaa mid ay maxkamad Holandees ah dhaarisay.

> Sida u dhaqsida badan iskugu soo ururi dokumentiga laga rabo codsiga. Waxa ay taasi kuu dedejineysaa dacwadda.

Dokumentiga

Waddamada laga yimid ma aha kuwa dokumentigooda is mid yihiin. Hadaba macquul ma aha in waddan kasta loo magacaabo dokumentiga codsiga laga rabo. Guud ahaan waxa ay IND oggoshahay dokumentiga **rasmiga ah** ee soo socda:

- *Aqoonsi:* basaboor, warqad aqoonsi, caddeyn qarannimo ama buugga ciidanka *(leh magac, maclumaadka dhalasho, sawir)*;
- *Xiriirka qooys:* shahaado nikaax, warqad dhalasho, buugga qooyska ama caddeynta qooyska ee diwaanka.

Dokumenti garab gal ah oo aan rasmi ahayn waxa ay noqon karaan sida:

- kaar iskuul, shahaadooyin, buugagta tallaalka;
- dokumenti ama caddeymo duqa tuulada, masaajidka, kaniisadda, notaayo ama bankiga;
- muuqaallo taswiir.

Waa in aad IND u soo dirtaa koobi oo dokumentiga oo dhan ee xubin kasta oo qooyska iyo foomka codsiga oo la buuxiyay. Xafid dokumentiyada asaliga ah waayo kuwaasi mar dambe ayaa loo baahn karaa.

Waxa IND u soo direysaa, foomka codsiga oo la buuxiyay oo dhammeystiran, lifaaqyada iyo sawir. Ciwaanka IND waxa uu ku yallaa foomka codsiga.

Tallabada 2: Helista iyo kontroolka codsiga

Ma soo gaaray IND codsiga ? Markaa warqad ayaa ka heleysaa. Halkaasi waxaa ku yaal magacyada xubnaha qooyskaada oo aad codsiga u soo gudbisay. Waxaa kaloo ku yaal taariikhda codsiga uu soo gaaray iyo goorta ay IND go'aanka ka qaadan doonto.

> Ma guurtay? Ka hor tag dib u dhac dacwadda oo si dhaqso leh beddelka ciwaanka ugu gudbi IND. War geli IND xitaa marka lagu siiyo hage kale oo Hey'adda u Adeegta Qaxootiga. Is beddelkaa waxa aad ku soo gudbineysaa qoraal ahaan.

Haddii codsiga laga hawl galo, waxa ay IND kontrooli doontaa in codsiga dhammeystiran yahay. Codsi waxa uu dhammeystiran yahay marka aad macluumaad kasta buuxisay. Aadna soo raacisay lifaaqyada iyo dokumentiga rasmiga ah. Ma yahay codsiga mid dhammeystiran? Markaa waxa ay IND go'aamineysaa in xubnaha qooyskaada ay ka soo baxeen xujjooyinka lagu heli lahaa oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay. IND waa ay diideysaa codsiga haddii ay isla markiiba caddaato in xubnaha qooyskaada aysan ka soo bixin xujjooyinka.

Ma yahay codsiga mid aan dhammeystirneyn? Marka dacwadda waa dheeraneysaa. Markaasi waxa aad heleysaa warqad. Waxaa ku qoran halkaas sida aad codsiga u soo dhammeystiri karto. Iyo ilaa taariikhdee ka hor taasi sameyn kartaa. Si deg deg leh ula tag qoraalkaas hagahaada ee Hey'adda u Adeegta Qaxootiga. Wakhti dheeraad ah ma u baahan tahay? Markaa soo wac shaqaalaha IND oo codsigaada gacanta ku haayo ama ha soo waco hagahaada Hey'adda u Adeegta Qaxootiga. Nambarka telefoon ee shaqaalaha IND wuxuu ku yaalaa warqadda.

Tallabada 3: Baaritaanka dukumentiga

Haddii ay tahay in xubnaha qooyskaada ay dokumenti ku muujiyaan aqoonsigooda. Iyo xiriirka (qooys) oo ay adiga jooga Nederland kula leeyihiin. IND waxay inta badan baareysaa in dokumentikaas sax yihiin. Haddii ay IND rabto in ay baarto dokumentiga rasmiga ah waxa aad markaa ka heleysaa warqad taasi lagu sharraxaayo. Baaritaanka dokumentiga waxa uu qaadan karaa dhow bilood.

Ma heeystaan miyaa xubnahaada dokumenti rasmi ah? Markaa waxa ay IND go'aamineysaa in uu jiro dhib weyn oo hor taagan caddeynta. Waa marka keenis la'aanta dokumenti aan lagu eedeyn karin xubnaha qooyskaada. Hadaba waa muhiim in aad si fiican ugu sharraxdo IND sababta aysan xubnaha qooyskaada u heli karin dokumenti rasmi ah. Laakiin xitaa in ay xubnaha qooyskaada aqoonsigooda iyo xiriirka ay kula leeyihiin ku muujin karaan dokumenti kale oo aan rasmi ahayn.

Tallabada 4: Baaritaan-DNA

Mararka qaar dokumentiga ay xubnaha qooyskaada keenan ma lagu qanci karo. Amaba xubnaha qooyskaada dokumenti maba heystaan. Markaa waxa ay IND u soo bandhigi kartaa baaritaan dheeraad ah. Taasi waxa ay dhaceysaa oo keli ah marka IND xaqiijiso in uu jiro dhib weyn oo hor taagan caddeynta. Baaritaan-DNA waa tusaale baaritaan dheeraad ah. Ma yahay xubinta qooyskaada ilmo aad dhashay ama waalidka ku dhalay hadii aadan qaangaar ahayn? Markaa waxa aad IND ka heleysaa warqad. Halkaasi waxa ay IND ku casumeysaa xubnaha qooyskaada baaritaan- DNA. Taasi waxa ay xubnaha qooyskaada ku muujin karaa in ay ilmahaada ama waalidkaada yihiin. IND taasi waxa ay kala hawl galeysaa safaaradda Nederland. Warqadda waxaa ku qoran maxaa adiga iyo xubnaha qooyskaada ay tahay in aad sameysaan.

Marka hore waxa ay xubnaha qooyskaada ka sameysanaayaan ballan safaaradda Nederland tan ugu dhow. Maalinta la ballamay waxa ay tagayaan dhismaha safaaradda. Halkaasi waxa uu dhakhtar, kalkaaliso caafimaad ama qof kale ka qaadayaa xubnaha qooyskaada dhecaanka daanka afka. Kaasi waxaa lagu qaadayaa qori yar oo gaar ah. Ka qaadista daanka afka xanuun ma leh mana aha mid caafimaadka wax u dhibeysa. Agabka-DNA waxa loo soo dirayaa IND-da Nederland. Xubnaha qooyskaada waa in ay si toos ah kugu wargeliyaan marka ay DNA-gooda ay ka qaaday safaaradda. Maalinta xigta waxa aad barta www.ind.nl aad ‘online’ ballan kaga dhigan kartaa ka qaadis astaamaha-DNA daaqadda qaabilaadda-IND ee Utrecht. Waxaa taasi u sameyneeysa nafsaddaada iyo xubnaha qooyskaada oo aad is dhasheen oo Nederland jooga haddii taasi loo baahan yahay.

Xubnaha qooyskaada waxa ay baaritaan dheeraad ah ugu tegayaan safaaradda Nederland ee ugu dhow. Si ay xitaa u hirgeliyaan bixinta mvv. Mararka qaar waa in ay xubnaha qooyskaada ka gudbaan xadka waddanka. Taasi darteed waxa dhici karta in ay dhibaato noqoto sidii ay dib ugu noqon lahaayeen waddankooda. Mas’uuliyadda arrinkaa waa mid ay xubnaha qooyskaada leeyihiin. Wakhti hore kala tasho xubnaha qooyskaada fursadaha ka gudbista xadka. Iyo nidaamka la xiriira gelista joogista iyo ka soo dhoofista waddanka ay safaaradda Nederland ku taal. Hawlaha hirgeli inta aadan ballan ka sameysan safaaradda Nederland.

Keddib adiga ayaa warqad ka helaayo IND. Halkaasi waxa laguugu casumayaa ballan si dhecaanka daankaada afka lagaaga qaado. IND waxa ay baaritaan ku sameyneysaa dhecaankaada iyo kan xubnaha qooyskaada. Baaritaanka-DNA waxa uu qaadan karaa dhow bilood. Marka la ogaado natiijada waxa aad IND ka heleysaa warbixnta taasi ku saabsan.

Tallabada 5: wareeysiga safaaradda Nederland

Ma yahay baaritaan-DNA mid aan macquul ahayn ama ma qabtaa IND su’aalo keddib baaritaan-DNA? Markaa waxa ay IND ku casumi kartaa xubnaha qooyskaada wareeysi. Wareeysiga waxa uu ka dhacayaa safaaradda Nederland oo dibedda ku taal. Wareeysigaas waxa ay xubnaha qooyskaada ku sharraxi karaan yay yihiin muxuuna yahay xiriirka idiinka dhaxeeya. IND waxa ay adiga kugu casumi kartaa wareeysi ka dhaca Nederland. Hirgelinta wareysiga safaaradda waxa uu qaadan karaa dhow bilood.

Tallabada 6: go’aan

IND waxa ay sugeysaa inta natiijada baaritaanka laga ogaado. Markaa waxa ay IND kontrooleysaa in xubnaha qooyskaada aad ka soo baxeen xujjooyinka kulligood. Waxa aad heleysaa go’aanka codsigaada xubnaha qooyskaada. Taasi waxa ay qaadataa dhow bilood ama mararka qaar ka badan marka mashquulka uu badan yahay. Taasi sida waafaqsan sharciga waa in ay dhacdaa gudaha saddex ilaa iyo lix bilood keenista codsiga keddib. Go’aanka intaa in ka dheer ayuu qaataa marka cufka shaqada sarreyso.

- Go’aan oggolaasho: haddii ay xubnaha qooyskaada ka bexeen xujjooyinka kulligood, IND codsiga ayeey oggolaneysa. IND waxa ay go’aanka u direysaa safaradda Nederland iyo adiga. Adiga ayaa xubnaha qooyskaada u sheegaaya go’aanka IND.
- Go’aan diidmo: haddii ay xubnaha qooyskaada ka soo bixin xujjooyinka kulligood, IND waa ay diideysaa codsigaada. Xubnaha qooyskaada (adiga) ayaa u qaadi karo dacwad celin go’aankaas. Adiga ama hagahaada Hey’adda u Adeegta Qaxootiga waxa aad baadi goobi kartaan qareen taasi kugu caawino.

Tallabada 7: hirgelinta bixinta mvv go’aan oggolaasho keddib

Ballan

Xubnah qooyskaada waa in ay mvv soo qaataan 3 bilood gudahood go’aanka oggolaasho keddib. Si taasi ay u hirgeliyaan waa in ay ballan ka dhigtaan safaaradda Nederland. Waa safaaradda lagu soo buuxiyay foomka codsiga. Ama halka ay xubnaha qooyskaada u tageen baaritaanka dheeraadka ah.

Safaaradda: foomka-mvv, saanta faraha, saxiixa iyo soo xareynta basaboorka

Xubnaha qooyskaada waa in ay hore sawir u soo qaataan. Sawirka waa in uu astaamo gaar ah leeyahay. Si ay mvv u hirgeliyaan waa in xubnaha qooyskaada marka hore ka buux buuxiyaan foomka siinta-mvv safaaradda. Keddib qof shaqaale ah ayaa xubnaha qooyskaada ka qaadaayo saanta faraha. Saxiix ayeey xubnaha qooyskaada saaraayaan. Safaaradda Nederland waxa ay xareyneysaa basabooradda xubnaha qooyskaada. Taasi waxaa loogu baahan yahay sidii mvv loo bixin lahaa. Wakhtigaasi waa in basaboorka yahay mid 6 bilood iyo ka badna horteed aan dhaceyn.

Ma laha miyaa xubnaha qooyskaad basaboor? Markaa inta badan waxa la siinayaa lasho-basare (LP) oo Nederland ah. LP waa dokumenti lagu safro oo loogu tala galay hal safar oo keli ah. Xubin kasta oo qooyska waa in ay keentaa la sawir oo dheeraad ah. IND ayaa safaaradda wargelineysa marka xubnaha qooyskaada LP la siin karo.

Sameynta mvv iyo saarista basaboorka

Safaaradda waxa ay sameyneysaa mvv. Taasi waxa ay ugu badnaan qaadaneysaa 2 usbuuc. Marka wax kasta ay diyaar yihiin, waxaa mvv-da (oo ah dhejis) la saarayaa basaboorka. Safaaradda waxa ay ku casumeysaa xubnaha qooyskaada in ay soo doontaan basaboorka oo leh mvv.

Safaaradda: soo qaadashada mvv iyo warbixin

Xubnaha qooyskaada waxa ay u noqonayaan safaaradda. Waxaa xubnaha qooyskaada dib loo soo siinayaa basaboorka oo leh mvv. Ama waxaa la soo siinayaa LP oo mvv leh. Waxaa kaloo la siinayaa warbixin qoraal ah oo ku saabsan waxa laga rabo in ay sameeyaan marka ay safar ku galaan Nederland.

Safaaradaha Nederland oo dhan marka laga reebo waddanka aay xubnaha qooyskaada ka yimadeen waa ay bixin karaan LP.

Tallabada 8: u safrista Nederland

Marka ay xubnaha qooyskaada ay soo qaataan mvv, waxa ay u safri karaan Nederland. Mararka qaar xubnaha qooyskaada waxaa quseyn kara nidaam gaar ah si ay waddanka dibadda ah oo ay joogaan uga soo safraan. VluchtelingWerk ayaa taasi habeynteeda kaa caawini karta. Mvv waxa ay hawl gal ahaneysaa 90 maalmood. Wakhtiga ay dhaceyso waxa ay ku taalaa mvv-dhejiska ah. Halkaasi waxaa ku yaal laba taariikhood:

- Taariikhda dhaqan galka (taariikhda ay mvv hawl gal tahay)
- Taariikhda dhicista (taariikhda ay mvv aysan hawl gal ahyn)

Xubnaha qooyskaada waa in ay iskood tikidyo duullimaad ay Nederland ugu safraan iibsadaan. IND waxa ay ku talineysaa in taasi aad sameeyso oo keli ah keddib soo qaadashada mvv. Ma ku hagtaa Hey'adda u Adeegta Qaxootiga? Mararka qaar waxa ay magdhabi karaan qeyb ka mid ah kharashka safarka. Weydii hagahaada maxaa macquul ah.

Qeybta 2. Dacwadda maganelyo ee Nederland oo xubnaha qooyskaada oo 2 tallabo ah

Tallabada 1: diwaangelin telefoon ah safarka keddib

xubnaha qooyskaada waa in ay 90 maalin gudahood u soo safraan Nederland kedibna ay telefoon isku diiwan geliyaan. Maalinta ay xubnaha qooyskaada soo galaan Nederland, waa in ay wacaan ama aad wacdo (Afsprakenlijn Nareizigers) Leynka Ballamada Ka Soo Daba Safrayaasha IND. Markaa waa la hubaa in ay mvv weli tahay hawlgal. Nambarka telefoonka ee 'Afsprakenlijn Nareizigers' waxa uu ku yaal warqadda go'aanka oggolaashada.

Shaqaalaha 'Afsprakenlijn Nareizigers' waxa uu u sheegayaa xubnaha qooyskaada goorma ayeey is diiwaan gelin karaan iyo rugta-dejjinta ee Xubinta Dhexe ee Dejjinta Magangelyo Doonka (COA) oo ay iska xaadirin karaan. COA ayaa u qaabilsan dejjinta iyo hagista inta dacwadda socoto. Rugta dejjinta waxaa kaloo ku sugan IND iyo Hey'adda u Adeegta Qaxootiga.

Tallabada 2: dacwadda magangelyo iyo oggolaashada xubnaha qooyskaada

Taariikhda la ballamay waxa ay xubnaha qooyskaada aadaayaan rugta dejjinta. Waxa ay halkaa dacwaddooda magangelyo soconeysaa ugu yaraan 4 maalin iyo 3 habeen. Xubnaha qooyskaada waxa ay jiifanaayaan rugta dejjinta. Adiga waxa aad jiifaneysaa gurigaada.

Inta badan dacwadda 4 maalin ayeey qaadataa. Mararka qaar waxa jiro shaki iyo wax aan caddeyn. Markaa waxa ay IND u gudbineysaa xubnaha qooyskaada dacwadda magangelyo ee guud. Taasi wakhti dheer ayeey qaadataa.

Inta ay rugta dejjinta ka socoto dacwadda xubnaha qooyskaada waxaa dhacayo inta soo socota:

- Shaqaale ka mid ah IND ayaa kontrool ku sameynaayo aqoonsigooda iyo saanta faraha. IND waxa ay sameynayaan sawir dijital ah waxa ayna qaadayaan saan faraha ah haddi kuwaasi ayna fiicneyn amaba aan la haynin.
- Xubnaha qooyskaada waxaa laga qaadi karaa baaritaan-tbc (qaaxo). In taasi la sameynaayo waxa ay ku xiran tahay waddanka aay xubnaha qooyskaada ka yimaadeen.
- Xubnaha qooyskaada waxa ay Hey'adda u Adeegta Qaxootiga ka helayaan sharaxaad ku saabsan dacwadda.
- Xubnaha qooyskaada waxa ay IND la yeelanaayaan wadahadal gaaban. IND waxa ay xubnaha qooyskaada siineysaa go'aan. Kaasi waa warqad ay ku taal in iyaga la siinaayo oggolaasho magangelyo oo la soo minguuriyay. IND waxa ay siineysaa xubnaha qooyskaada oggolaashahooda joogitaan. Haddi aysan taa macquul ahayn, markaa IND waxa ay u sheegeysaa sida ay dacwadda u sii socon doonto.
- Xubnaha qooyskaada waxa ay wadahadal gaaban la yeelanaayaan shaqaale ka tirsan COA.
- Waxa ay xubnaha qoyskaada la hadlayaan shaqaale ka socda dowladda hoose. Dowladda hoose waxa ay xubnaha qooyskaada ka diiwaan gelineysaa diiwaanka dadweynaha.
- Maalinta ugu dambeysa xubnaha qooyskaada waxa ay ka tegeyaan rugta dejjinta. Waxa ay soo aadaayaan gurigaada. Haddii taasi (ay weli) macquul ahayn, COA iyo dowladda hoose ayaa dejjintooda hirgelinaayo.

Keenis codsi magangelo oo kuu gaar ah

Xubnaha qooyskaada waxaa Nederland lagu siinayaa oggolaasho joogitaan magangelyo oo la soo minguuriyay. Taasi waa oggolaasho wakhti xaddadan kuna lamaansan oggolaashadaada magangelyo. Ma ceshatay IND oggolaashaha magangelyo ama ma dheeren weeysay taa? Markaa IND waxa ay xitaa ceshaneysaa oggolaashaha joogitaan ee xubnaha qooyskaada. Waxa ayna go'aamineysaa in ay heli karaan oggolaasho magangelyo oo u gaar ah. IND waxa ay xitaa ceshan kartaa oggolaashahooda joogitaan marka xiriirka qooys uu go'o. Taasi waa marka ay xubnaha qooyskaada aysan adiga cilaaqaad kula lahayn. Ama hadii xubinta qoyskaada uu yahay ilmo oo sannad gudihiis iskiis u degay.

Ma doonayaan in xunaha qooyskaada ay sababo magangelyo oo shaqsi ah awgood ay codsi magangelyo u gaar ah la yimaadaan? Markaa waxa ay taasi ku sheegi karaan IND wadahadalkeeda ee rugta dejjinta. Shaqaalaha-IND ayaa taasi ka bixinaaya sharraxaad. Haddii xubnaha qooyskaada ay keenaan codsi magangelyo oo u gaar ah, waxa ay raacayaan dacwadda magangelyo ee guud. Dacwadda magangelyo ee guud wakhti dheer ayeey qaadataa. IND waxa ay baareeysaa in xubnaha qooyskaada shaqsi ahaan ay u qalmaan difaaca dowladda Nederland. Haddii ay taasi sax tahay, waxaa la siinayaa oggolaasho magangelyo oo u gaar ah oo wakhti xaddadan. Waa macquul in ay xubnaha qooyskaada wakhti dambe la yimaadaan codsi magangelyo u gaar ah.

Haddii xubin qooyskaada ah uu qooyska ka mid yahay, waa u macquul in isku keenista qoyska isaga ama iyada ay ugu soo safarto Nederland. Qofka waxa uu xiriir qoys la lahaan karaa qofka ay lammane-(guur) yihiin iyo carruurtooda (ay dhaleen). Ilmo waxa uu xiriir qoys la lahaan karaa labada waalid oo dhashay. Inta badan waxaa jirta in qof reerka ka mid ah uu hal qoys un ka tirsan yahay. Waxaa dhici karta in qof dhallin yar oo qaan gaar ah in uusan ka tirsaneyn qoyska waalidiintiisa oo markaa ay leeyihiin qoyskooda u gaar ah lammane-(guur). Kiiskaan iyo kuwa kale xitaa waxa uu xubinta reerka ee isaga ah ka soo dabasafre uusan u noqon karin dalbade xubin kale oo reerka ka mid ah. Xitaa hadii isaga ama iyada la siiyo oggolaasho magangelyo oo shaqsi ahaan u gaar ah.

Dib ula noqosho codsi

Xubnaha qooyskaada wakhti kasta ayeey codsiga dib ula noqon karaan. Marka taasi u soo gudbi hagahaada ee Hey'adda u Adeegta Qaxootiga si uu toos ugu sii gudbiyo IND. Ma ka noqdeen xubnaha qooyskaada codsigaasi mana codsadeen wakhti dambe hadana isku keenista qooyska? Markaa inta badan ma soo dhammeystiri karaan xujjooyinka.

Ka hawl galka macluumaadka shaqsiga

Macluumaadka shaqsiga waa warbixinno kala duwan oo adiga kuugu saabsan. Hey'adaha oo buuggan warbixinta ka wada shaqeeyay waxa ay ku xusan yihiin xagga hoose. Hey'adahaan waxa ay ka hawl galaan macluumaadka shaqsiga inta uu socoto codsigaada magangelyo, weydiisigaada ama is xaadirintaada. Iyaga ayaa ku weydiinaayo macluumaadkaada iyo hey'ado kale iyo dad kale haddii loo baahdo. Hey'adahaan waa ay isticmaalaan waana ay keydiyaan macluumaadkaada waxa ayna u gudbiyaan hey'ado kale haddii ay taasi sharciga waafaqsan tahay. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa ku yaal waajibaadka hey'adaha ka hawl galo macluumaadkaada. Waa in ay tusaale ahaan, si taxadder leh oo amaankeeda sugan yahay u adeegsadaan macluumaadkaada. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa kaloo ku yaal xuquuqdaada, tusaale ahaan:

- in aad aragto ogaatana macluumaadkaada hey'adaha la yaal;
- in aad ogaato waxa ay hey'adaha ku sameyaan macluumaadkaada iyo sababta;
- in aad ogaato hey'adahee loo gudbiyay macluumaadkaada.

Ma dooneysaa in aad dheeraad ka ogaato ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga iyo xuquuqdaada? Markaa eeg websiteyada hey'adaha. Xagga hoose ee buuggan warbixinta ka akhriso ciwaannada websiteyada.

Su'aalaha inta badan la'is weydiiyo

Ma soo gudbin kartaa codsi mvv-ka daba safrayaal magangelyo haddii xubnaha qooyskaada la la'yahay?
Haa. Haddii xiriirka aad la lahayd xubnaha qooyskaada lumay, waa aad keeni kartaa codsiga. Waayoo codsi oo keli ah ayaad ku xajin kartaa muddada ka soo daba safrayaasha. Mararka qaar Rode Kruis (Lankheyrta Cas) ayaa kuugu caawini karta helista xubnaha qooyskaada. Taasi waxaa loo yaqaan 'tracing' (baadi goob). Hagahaada ee Hey'adda u Adeegta Qaxootiga ayaa taasi kugu caawini karaa.

Macquul miyaa in xubnaha qooyskaada ay caddeynta dhacdooyinkii hore ku saxeexaan safaaradda Nederland?
Maya, taasi macquul ma aha. Ma dhibaato ayaad kala kulantay u soo dirista Nederland ee caddeynta dhacdooyinkii hore oo saxeexan? Kala tasho IND maxaa ugu wanaagsan oo aad yeeli kartaa.

Xageen ayaan xubnaha qooyskeeyga la degayaa haddii aan aniga weli degganahay rugta-COA?
Arrinkaa waxaa ka wada shaqeynaaya dowladda hoose iyo COA. Weydii hagahaada ee COA¬ ee rugtaada dejjinta maxaa macquul ah.

Ma qabtaa su'aalo keddib akhrinta buuggan warbixineed?
Waxa aad su'aalahaa weydiin kartaa hagahaada ee Hey'adda u Adeegta Qaxootiga.

Ma qabtaa cabasho?
Dhammaan hey'adaha ku mashquulsan dacwadda isku keenista qoyska, waa kuwa shaqadooda u carbisan si taxadder lehna u fuliya. Miyaadan ku qanacsaneyn sida xubnaha qooyskaada ay ula hawl gashay hey'ad? Markaa waxa aad ka keeni kartaa cabasho. Hagahaada ee Hey'adda u Adeegta Qaxootiga ayaa taasi kugu caawini karaa.

Daabacaddaan waxaa si wadajir ah u soo saaray:
Xubinta Dhexe ee Dejjinta Magangelyo Doonka | www.coa.nl
Adeegga Dib u Celinta iyo Ka Saarista | www.dienstterugkeerenvertrek.nl
Adeegga Migreshanka iyo Jinsiyadda | www.ind.nl
Guddiga u Gargaarka Sharciga | www.rvr.org
Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland | www.vluchtelingenwerk.nl

Waa hawlgelinta :
Wasaaradda Cadaaladda iyo Nabadgelyada, maamulka Siyaasadda Socdaalka www.rijksoverheid.nl

Wax xuquuq ah kama dhaxleysid nuxurka soo saarista daabacaddaan. Haddii ay tarjumista keento in macnaha si kale loo rogi karo, waxaa markaa ah afka Nederlandka midka la raacaayo.